`

ADEEGYADA KORMEERIDA BOSTON

# Nidaamka Racfaanka ee Guddiga Deegaameynta

*Tilmaamaha Nidaamka Racfaanka ee Guddiga Deegaameynta Magaalada*

*Waaxda Adeega Kormeerka ee Magaalada Boston waxay bixisaa oo ay fududeysaa shatiyada iyo ruqsadaha looga baahan yahay deegaanka iyo dhismooyinka ganacsiga ee Magaalada Boston.*

Boston waxay ka shaqeyneysaa inay fududeyso helitaanka ruqsadaha ayadoo hagaajineysa nidaamka loo maraayo. Tilmaamahaan waxaa loo soosaaray inuu caawiyo dadka reer Boston, mulkiilayaasha hantida iyo qandaraaslayaasha ayadoo loo maraayo nidaamka ruqsada, ayadoo isla markaana la caddeynaayo sida Xeerka Deegaameynta Boston iyo hannaanka racfaanada ay gacan oga geystaan kor u qaadida dhaqanada xaafadaheena iyo niyad jabinta hormarka aan wanaagsanayn.

# Micnaha Ereyga Deegaameynta

Deegaameyntu waxay nidaamisaa isticmaalida, cufka, cabirka xaduudaha iyo dheerarka dhismooyinka iyo dhulalka gaarka loo leeyahay. Illaa intii xad ah Xeerka Deegaameynta Magaalada Boston waxay ku saleysan tahay ujeedada guddiga qorsheynta ee mashaariicda yaryar. Wuxuu mulkiilayaasha iyo curiyaasha u oggolaanayaa inay dhisaan mashaariicda mar haddiba soo jeedintu waafaqsan tahay shuruudaha Xeerka Deegaameynta Tusaale ahaan, waxay mulkiilaha u oggolaan kartaa inuu xoogaa guriga taago, laakiin waxay ka hortagi kartaa in aaga degmada laga sameeyo dukaan gada qalabyada baabuurta.

Xeerka Deegaameynta Magaalada Boston waxaa lasoo saaray 1964 waxaana wax laga badelay dhowr jeer wixii intaa ka danbeeyay. Isbadeladaas la sameeyay waxay aqoonsadeyn gaar ahaanshaha iyo dhaqanka qaab dhismeedyada xaafadaha Boston.

Xaqiiqdii, inta badan xaafadaha ka baxsan aagaga magaalada hoose waxay mar ahaan jireen magaalooyin kor loo sii qaaday sanadihii lasoo dhaafay.  Maanta waxaa jira 18 xaafadood oo degmada kuyaala, 9 degmooyin hoose ah, 14 nooc oo qaab oo ujeedooyin degmooyin loo diyaarinaayo (ayna kujiraan *nidaamyada lagu kaydiyo biyaha dhulka hoostiisa kujira*, xeerka qorsheynta dhulka, iwm...) iyo dhowr meelood oo loogu talagalay deegaano, ganacsi, shirkado iyo aagag furan oo lagu dabaqaayo xeerka aasaasiga ah. Deegaameynta waxaa loogu talagalay in lagu oggolaado dhismooyinka ama isticmaalida dhismooyinka, qaab dhismeedka ama hantida maguurtada ah ee la jaanqaadeysa bilicda xaafada. Deegaameynta sidoo kale waxay kor u qaadaa hormarka wanaagsan, ilaalinta bii'ada iyo guriyeyn caddaalad ku dhisan.

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan isticmaalida hanti gaar ah, tallaabada koowaad waa inaad go'aansato *degmo deegaameynta iyo degmo hoosaadka oo ah meesha hantidu ku taalo.* Sidoo kale waa inaad ka feejignaataa degmooyinka xadiidan, maadaama arrintaasi saameyn karto deegaameynta.  *BPDA Khariirada Deegaameynta* waxay bixiyaan awood lagu baari karo ciwaanada khuseeya macluumaadka deegaameynta degmada. Adoo ciwaanka ku qoraaya qaybta baaritaanka waxaad wax ka baran kartaa deegaameynta degmada, degmo kasta oo xadidan oo jirta.  Sidoo kale waxaad lifaaq ka heli doontaa qaybta Xeerka Deegaameynta oo loogu talagalay deegaameynta degmada khuseysa hantida gaarka ah.

Marka aad hesho degmo la deegaameenaayo iyo degmo hoosaad, waxaad u baahnaan doontaa inaad fiiriso qaabka loo isticmaalida nidaamka deegaameynta degmada.

Isticmaalida nidaamka deegaameynta wuxuu aqoonsan doonaa isticmaalida la oggol yahay iyo isticmaalida gargaar oga baahan doonta deegaameynta ZBA. Si aad u hesho macluumaadkaan, waxaa jira labo dookh. Dookha koowaad waa lifaaqa kujira qoraalka koowaad ee deegaameynta iyo nidaamka deegaameynta oo aad ka helayso bogga macluumaadka deegaameynta degmada oo kujira webseedka kore. Dookha labaad waa inaad si toos ah u booqato [Xeerka Deegaameynta Boston](). Halkaan, waxaad ka heli kartaa qoraalka koowaad ee deegaameynta degmo kasta oo ay la socdaan nidaamka deegaameynta iyo nidaamyo kale oo ka kooban macluumaad muhiim ah.

Marka aad hesho nidaam deegaameyn oo ku habboon deegaameynta degmada iyo degmo hoosaadka, waxaa jiri doonaa liisaska adeegsiga oo leh xarfaha A, C ama F. A waa la oggol yahay in la isticmaalo. C shuruud ayaa ku xiran in la isticmaalo, waa in la helo shuruuda oggolaanshaha ZBA si loo isticmaalo. F lama isticmaalo karo, kaas oo u baahan oggolaansho isticmaalida aan la oggoleyn ZBA. Marka aad raadineyso isticmaalka nidaamka deegaameynta, sidoo kale waa inaad feejignaan dheeraad ah saarto ogeysiiska qaybta hoose ku qoran.

Marka aad ogaato in isticmaalida la oggol yahay iyo inkale ama aad u baahato gargaarka deegaameynta, waa inaad marka xiggta eegto cabirka nidaamka deegaameynta ee loogu talagalay deegaameynta degmada. Sharciyada cabirka geesaha waxay soo rogaan shuruudo ku saleysan cabir la raacaayo marka wax dhisaayo iyo cabirka dhismaha ee la dhisi karo. Tusaale ahaan, ayadoo lagu saleynaayo degmada, waxaa jiri karaa aag ugu yar ama aag balaciisu ugu yar yahay. Waxaa jiri kara cadad lagu xadidaayo qaybta hore ee wadada. Waxaa jiri kara shuruudo lagu xadidaayo deyrka hore, deyrka dembe, iyo deyrka geesaha. Sidoo kale waxaa jira xadid loo yeelaayo dheerarka dhismaha ama inta dabaq ee ugu badan ee uu dhismuhu yeelan karo (kaas oo lagu saleenaayo aaga sagxada guud ee dhismaha iyo aaga saamiga).

Maqaal kasta oo deegaameyn wuxuu ka kooban yahay qodobo sharaxaaya sida cabirada iyo sharciyada loogu dabaqi karo ama shuruudo gaar ah oo lagu saleynaayo aaga baakinka wadada, qaab dhismeedka fooqa ama goobta albaabka ugu wayn ee laga galaayo goobya, iyo sidoo kale shuruudo kale oo ku saleysan deegaameynta. Sidoo kale waxaa jiri kara hab qorsho oo degmada u degsan (sida Habka Qorshaha Nidaamka Biyo Kaydinta, Habka Qorshaha Ilaalinta Nidaam deegaameynta, ama Habka Qorshaha kumeel gaarka ah) oo hantidaada khuseeya. Haddii uu jiro nidaam qorshe oo lagu dabaqaayo hantidaada, waxaa in lagu arki karo Khariirada deegaameynta marka la fiirinaayo hantidaada. Haddii nidaam qorsho uu jiro, waxaa laga yabaa in shuruurdo dheeraad ah ay jiraan oo lagu saleynaayo mashaariicda lasoo jeediyo.

Sidoo kale waxaa jira qaybo qeexitaan oo laga dhex helaayo Khariirada Deegaameynta (ood

ka heli karto Maqaalka 2 aad iyo 2A) oo ay ku qoran yihiin shuruudaha koowaad ee deegaameynta. Waa inaad la tashato qaybaha qeexitaanada, qodobada maqaalka ee khuseeya deegaameynta degmada, qaybta nidaamka qorshaha (haddii ay macquul tahay) marka laga imaado isticmaalida iyo jadwalada cabirka marka la oggaaminaayo waxyaabaha la oggol yahay inaad u isticmaasho hantidaada ama qaab dhismeedka aad isticmaali karto.

**OGEYSIISKA COVID-19:** Guddigu wuxuu badelay qaybo badan oo kamid ah nidaamyadiisa sababo la xariira aafada COVID-19 si Guddigu sida ugu wanaagsan ugu sii wado shaqadiisa asagoo ilaalinaaya amniga dadwaynaha. Tusmadaan waxaa ku qoran isbadeladaas la sameeyay; qaar badan oo kamid ah ayaa sii jiri doonaa kadib marka laga baxo xaalada degdega ah ee Caadimaadka dadwaynaha, qaar kalena waxaa laga yaabaa inaysan sii jirin.

Isla muddadaan aan daabacaayo Tusmadaan, Guddigu wuxuu sii wadaa inuu dhageysiyadiisa ku qabto qaab oonleen ah ayadoo la adeegsanaayo aalada WebEx sida ku qoran *Xeerka Kordhinta Qaar kamid ah Tallaabooyinka COVID-19 ee la qaatay Muddadii lagu jiray Xaalada Degdega ah ee Gobalka* oo uu saxiixay Guddoomiye Baker markay bishu ahayd Juun16, 2021.  Si loo hubiyo dhageysiga ZBA inuu u furan yahay dadwaynaha, xubnaha dadwaynaha waxay dhageysiga oga qaybgeli karaan kulan taleefan ama muuqaal ah

.

# Su'aalaha Inta Badan la Isweydiiyo

- **Yaa qayb ka ah Guddiga Racfaanka Deegaameynta (ZBA)?-** ZBA wuxuu ka kooban yahay *todobo xubnood iyo todobo xubnood oo badel u ah* oo uu soo doorto Maayarka. Mid kasta wuxuu shaqeeyaa saddex sano. ZBA guud ahaan waxay qabtaan labo dhageysi hal dhegeysi oo ay qabtaan gudi goosoodka bishiiba mar. Dhageysiga waxaa la qabtaa Talaadada laga bilaabo 9:30 subaxnimo waxaana lagu qabtaa City Hall, Qolka 801. Dhegeysiga ay qabtaan guddi hoosoodka waxaa la qabtaa Khamiista bil kasta laga bilaabo 5:00 galabnimo. Ogsoonoow: *Waxaa lagu dari karaa taariikho kulan oo dheeraad ah.*

  *Guddi hoosaadka latalinta deegaameynta waxay ka kooban yihiin saddex xubin oo guddiga ah iyo waxayna ku shaqo leeyihiin 1-2 mashaariicda qoysaska deegaanka ah iyo ganacsiyada yaryar ee ku fadhiya 35,000 isku weer fiit. Soojeedinada guddi hoosaadka waxaa lasoo gudbiyaa kahor dhageysiga guddiga buuxa intaan loo codeen. Ujeedada ugu wayn ee guddi hoosaadka waa inay taariikheeyaan dhageysiga iyo inay waqti siiyaan xubnaha buuxa ee dhageysiga si ay yoolka u saaraan mashaariicda waawayn.

- **Waa maxay Shaqada Guddiga Racfaanka?-** ZBA waxay dhageystaan racfaanada si ay

u bixiyaan gargaar deegaameyn sida ku xusan xeerka ama oggolaanshaha gaarka ah ee ku saleysan in dhismooyinka la dhiso ayadoo la adeegsanaayo shuruuda oggolaanshaha. Haddii mashruuca uusan deeqeyn cabirka shuruudaha iyo isticmaalka, oggolaanshaha dhismaha lama bixin karo. Codsdaha wuxuu racfaan usoo gudbin karaa ZBA si uu u codsado oggolaanshaha inuu dhisto wax aan u hogaansaneyn shuruudaha Xeerka Deegaameynta. Codsadaha waa inuu ZBA ku qanciyaa inay kasoo baxeen shuruudaha cududaarka ee u hogaansanaanta hal ama in kasii badan oo ah shuruudaha Xeerka Deegaameynta. Haddii ZBA oggolaato racfaanka, codsadaha wuxuu sii wadi karaa hawsha oggolaanshaha. Si lamid ah, ZBA waxay awood u leedahay inay dhageysato codsiyada gargaarka ee ka dhanka ah Xeerka Dhismaha Gobalka oo ay la socdaan dalabaadka racfaanada ama go'aanada guddiga dhismaha.

- **Goortee iyo Meeshee ayaan usoo gudbiyaa Foomka Racfaanka?-** racfaanka waa in lasoo gudbiyo 45 maalmood gudahood oo laga bilaabo taariikhda warqada diidmada ay soo direen Waaxda Adeegyada Kormeerka Boston (ISD). Qaabka ugu fudud ee racfaan loosoo gudbin karo waa inaad isticmaasho *bar oonleen ah*. Racfaanaada waxaa sidoo kale soo gudbin kara qof, ama wakiil ka socda ISD waxaana loosoo gudbinayaa dhismaha kuyaala 1010 Mass Ave., Boston.

- **Hay'adee Dib u eegida iyo Soojeedinada usoo Gudbisa ZBA?-**Hay'ada Qorsheynta iyo Hormarka Boston (BPDA) waa hay'ada qorsheynta Magaalada. Hay'adaan waxay dib u eegis ku sameysaa racfaanka dabacsanaanta deegaameynta ee lasoo gudbiyo ZBA iyo warbixinada qoran ee soojeedinada loosoo gudbiyo ZBA. Tallooyinka BPDA waa latalin oo keliya. ZBA waxay gaartaa go'aanka ugu danbeeya oo ku saabsan diidmada ama oggolaanshaha dabacsanaanta deegaameynta.

BPDA iyo *Xaafiiska Maayarka Adeegyada Xaafada* waxay sidoo kale dalbaan karaan iyo/ama tallooyin ka heli karaan mulkiilaha hantida iyo kooxda bulshada, haddii ay macquul tahay, waxayna balamin karaan kulan u dhaxeeya dadka dhismooyinka dhisaaya iyo kooxaha xaafada. Wakiil ka socda hay'adahaas ayaa ka qaybgeli doona dhammaan dhegeysiyada. Dhammaan hay'adahaas waxay u diyaarsan yihiin ama doonayaan inay caawiyaan codsadaha.

- **Waa maxay doorarka Golayaasha Magaaladu ku leeyihiin Dhageysiga ZBA?** Golaha Magaalada iyo Kaaliyaashooda waxay ka qaybgalaan kulanada bulshada iyo Dhageysiyada ZBA waxayna soo jeediyaan soojeedino si ZBA u ansixiso, wax oga badesho ama u diido racfaanka. Golayaasha iyo xubnaha kalkaaliyaashooda waxay caawin karaaan codsadaha si uu u qorsheeyo racfaanka deegaameynta iyo hawlaha

bulshada. Soojeedinada laamaha dawlada, sida golayaasha magaalada, waa talo bixin oo keliya.  ZBA waxay gaartaa go'aanka ugu danbeeya oo ku saabsan diidmada ama oggolaanshaha dabacsanaanta deegaameynta.

- **Goorma iyo halkee lagu soo Dhejiyaa Ajandaha?**-Ajandaha waxaa lasoo dhejiyaa 48 saacadood kahor dhageysiga waxaana laga heli karaa *webseedka* magaalada ayadoo la adeegsanaayo ogeysiisyada dadwaynaha.

- **Sidee ku oggaan kartaa in racfaanka la Aqbalay ama lan Diiday?** -Kadib marka la dhageysto dhammaan macluumaadka, ZBA waxay cod u qaadi doontaa go'aanka looga dhawaaqi doono dhageysiga. Go'aanka ZBA wuxuu noqon doonaa mid kama danbeys ah kadib marka go'aanka qoraalka ah lagu qoro ISD. Qofka codsanaaya habka dabacsanaanta ZBA waxaa nuqul loogu diri doonaa go'aanka ZBA oo qoran kadib marka la buuxiyo sidoo kale ogeysiisyada go'aanka waxaa boosto loogu diri doonaa mulkiilayaasha. Waxaan abuurnay *ZBA Tracker*  kaas oo u oggolaanayaa in daawadayaashu adeegsadaan khariirad isdhexgal leh si ay oga eegaaan mashaariicda raadiyaana gargaarka ayagoo ku dhufanaaya su'aalaha xaafada ee kujirta khariirada ama ayagoo qoraaya ciwaanka bixinaaya macluumaadkaan dheeraadka ah ee soosocda ee loogu talagalay mashruuc kasta oo lasoo jeediyo:

## Ereyada Inta Badan La Adeegsado

- **Xaq u leh** waa mashruuca kasoo baxa shuruudaha Dhismaha iyo xeerarka Deegaameynta, haddaan si kale u dhigno waa mashruuca aan u baahneyn gargaarka Guddiga.

- **Oggolaanshaha Isticmaalka Shuruudaysan** waa nooc kamid ah gargaarka deegaameynta oo oggolaanaya in la adeegsado loo aqoonsaday inuu kasoo baxay shuruudaha Xeerka Deegaameynta.  Waa hay'ad leh awood ay ku bixiso Oggolaansho Shuruud Wata kadib markay oggaato in laga soo baxay shuruudaha la iska rabo.

- **Baajinta** waa sii wadida dhageysiga racfaanka ee ZBA laga dhigaayo taarikh dambe.

- **Dib u eegida Naqshada** waa nidaaam BPDA ku eegeyso mashruucyada si ay u fiiriso inay u hogaansan yihiin mabaadiida naqshada u degsan deegaaameynta degmada ama shuruudaha gaarka ah ayadoo loo maraayo DIb u Dulmar Mashruuca ee Yar ama Dulmarka Mashruuca ee Wayn.  ZBA waxay sidoo kale u baahnaan kartaa Dulmarka Naqshada sida heshiisku dhigaayo marka la bixinaayo gargaarka deegaameynta.

- **Shuruudaha Cabirada** waa cabirka ugu yar ee goobta, cabirka dhismaha ee la dhisi

karo, iyo goobta dhismaha laga dhisi karo.  Tusaalayaasha inta badan la adeegsado ee ku saabsan shuruudaha cabirka waxaa kamid ah cabirka ugu yar ee la oggol yahay, cabirka fooqa hore, cabirka derbiga (oo sidoo kale loo yaqaan shuruudaha deyrka), aaga sagxada (FAR), iyo dheerarka.

- **GCOD, GPOD iyo IPOD:** Nidaamka qorshaha Ilaalinta Meelaha Biyaha lagu kaydiyo (BCOD), Nidaamka qorshaha Ilaalinta qorshaha deegaameynta (GPOD), Nidaamka Qorshaha Qorsheynta Kumeel gaarka ah (IPOD,) Nidaamka Qorshaha Naqshada Xaafada "NDOD" ayaa ah tusaalayaasha nidaamka qorshaha degmada ee loo adeegsan karo mashruuca.  GCOD waxay ka jawaabtaa walaacyada laga qabo heerarka biyaha dhulka hoostiisa gaar ahaan meelaha laga dhisay dhulalka la buuxiyay, GPOD waxaa loogu talalagalay in lagu ilaaliyo meelaha banaan gaar ahaan aagaga wadada, iyo IPOD waa deegaameynta kumeel gaarka ah ayadoo la qorsheenaayo dib u habbeyn.

- **Nidaamka dheereynta dhismaha** waa qayb kamid ah oggolaanshaha dhismooyinka ama qaab kale u dhisida dhisme taagan, dhisida dhismo cusub, si loogu saleeyo isbadelka deganaanshaha, sida adeegsashada guryaha, balaarinta hooyga, shaqooyinka kale oo ku lugta leh.  Codsiyada Oggolaanshaha nidaamka dheereynta dhismaha waxaa laga eegaa inay u hogaansan yihiin shuruucda Dhismooyinka iyo Xeerarka Deegaameynta waana in dukumiintiyada iyo qorshooyinka ay shaabadeeyaan xirfadlayaal dhismo oo ruqsad haysta.

- **Isticmaalid la'aanta ama U hogaansanaanta la'aanta shuruucda** waa qaab dhismeed markii hore u hogaansanaa sharciyada deegaameynta laakiin dib ka noqday midaan u hogaansaneyn sharciyada deegaameynta kadib markii la badelay sharciyada deegaameynta ee jiray ama lasoo saaray sharciyo deegaameyn oo cusub.

- **Dib u dhacyada** waxay qeexayaan cabirka ugu yar ee loo oggol yahay wajahada, gadaal iyo geesaha laymanka dhismaha ee laga rabo dhismaha ama qaab dhismeeedka.  Waxaa loo yaqaan shuruudaha deyrka ee Xeerka Deegaameynta (tusaale deyrka hore, deyrka gadaale, deyrka geesaha).

- **Foomka Gaaban** waa nooc kamid ah oggolaanshaha lagula socdo isbadelada dhismooyinka jira.  Guud ahaan majiraan dib u eegis deegaameyn oo qaab gaaban lagu bixiyo iyo badanaa qorshooyin ama sawiro laga soo qaado xirfadle ruqsad haysta looma baahna.

- **Isticmaalida aan la oggoleyn** waa nooca kamid ah gargaarka deegaameynta ZBA oggolaan karto si ay u oggolaato isticmaalida aan la oggoleyn ama qaab dhismeedka

aan u hogaansanayn shuruudaha cabirka.

- **Warqada Diidmada Xeerka Deegaameynta** tani waa warqad ay bixiyaan ISD marka mashruucu uusan kasoo bixin shuruudaha. Warqadu waxay tilmaamtaa qodobada kujira Xeerka Deegaameynta ee aan laga soo bixin. Waa sharci in la helo warqadaan si loo xareeyo racfaanka ZBA ee gargaarka deegaameynta.

- **Warqada Diidmada Xeerka Dhismaha** tani waa warqad ay bixiyaan ISD marka mashruucu uusan kasoo bixin shuruudaha ama qaybo badan oo kamid ah Xeerka Dhismaha Gobalka. Warqadu waxay tilmaamtaa qodobada kujira Xeerka Dhismaha Gobalka ee aan laga soo bixin. Warqadaan waa in sidoo kale la helaa si loo xareeyo racfaan ayadoo loo diraayo midkood Guddiga Gobalka ee qaabilsan Shuruudaha iyo Xeerarka Dhismaha "BBRS" ama Magaalada Boston "ZBA" ee qaabilsan xeerka gargaarka dhismaha.

# Tallaabooyinka Hawsha Racfaanka ZBA

### Tallaabooyinka Hawsha Racfaanka ZBA waxaa kamid ah:

- *Soo gudbinta Racfaanka*
- *Jadwalka Hawsha Bulshada / Kulanka Mulkiilaha*
- *Dhageysiga ZBA*
- *Qorista Go'aanka*
- *Dib u eegista Xeerka Dhismsha*
- *Bixinta Oggolaanshaha*

## Tallaabada koowaad: *Soo gudbinta Racfaan*

Marka la diido codsiga nidaamka dheereynta dhismaha oo uu codsaduhuna helo Warqada Diidmada Deegaameynta, waxay haystaan 45 maalmood inay kusoo gudbiyaan racfaan oo laga bilaabo taariikhda ay helaan warqada racfaanka.

Qaabka ugu fudud ee racfaan loosoo gudbin karo waa inaad isticmaasha bar oonleen ah. Sidoo kale waxaad foomamka racfaanka, oo ay la socdaan macluumaad qeexan ka heli kartaa, ISD, Qaybta 4aad inta u dhaxeysa saacadaha 8:00 a.m. - 4:00 p.m., Isniinta illaa Arbacada, Khamiista 8:00 a.m. illaa 7:00 p.m.

Codsadayaashu waa inay kusoo gudbiyaan ayna soo geliyaan barta oonleenka ah (1) dukumiinti si originaal ah loo qoray laguna codsanaayo racfaan, (2) Warqada Diidmada Deegaameynta iyo (3) Warqada Oggolaanshaha (laakiin waa keliya haddii hay'ad ama qole kale oo saddexaad oo aan ka ahayn qofka codsanaaya uu soo diyaariyo foomka). Magaca mulkiilaha

hantida iyo saxiixa waa inay kuyaalaan foomka racfaanka.

Haddii qareen, hay'ad ama qole kale oo saddexaad soo diyaariso foomka, waa **qasab** in lagu soo daro warqada oggolaanshaha.  Ogsoonoow: Kireystaha ganacsiga leh ayaa xareen kara asagoo matalaaya mulkiilaha, ayadoo kireystuhu bixinaayo warqada oggolaanshaha ee uu la helay mulkiilaha.

Kadib marka racfaankaaga la aqbalo, ogeysiis iimayl ah ayaa loo diri doonaa codsadaha looga codsan doono inay saxiixaan akoonka bartooda si ay u bixiyaan kharashaadka. Kharashaadka lagu xareynaayo racfaanka waa $150 gaar ahaan dhammaan dhismooyinka la degan yahay oo leh saddex qaybood ama kasii yar iyo $150 oo laga qaadaayo magaalo kasta ama gobal kasta oo sameeya xadgdub ayadoo lagu saleenaayo dhammaan dhismooyinika ama dhismooyinka la degan yahay ee ka badan saddex qaybood.

Kharasha waxaa sidoo kale la siin karaa lacag hayaha degaan 1010 Mass Ave., Qaybta 4aad, marka la buuxinaayo racfaanka foomka. Lacag bixintu waa inay tahay kaash/lacag cad, dalab lacag, jeeg shaqsi, MasterCard, ama Visa.ISD ayaa intaas kadib codsadaha siin doonta boor ay ku qoran yihiin macluumaadka racfaanka si loogu dhejiyo guriga.

## **Tallaabada Labaad:** *Jadwalka Hawsha Bulshada / Kulanka Mulkiilaha*

Codsadayaasha waa inay la xariiraan Xaafiiska Maayarka ee Adeegyada Xaafada (ONS) si ay u bilaabaan hawlaha bulshada.  Xiriiriyaha ONS wuxuu fududeyn doonaa kulanada mulkiilayaaasha iyo kulan kasta oo kale oo muhiim u ah hawlaha bulshada. Codsadayaashu sidoo kale waa inay la kulmaan kooxaha xaafada si ay oga wada hadlaan soojeedintooda. Xiriirayaha ONS wuxuu shaqaalaha ZBA u sheegi doonaa goorta nidaamka bulshada la dhameeyo markaas shaqaalaha ZBA waxay qaban doonaan taariikhda dhageysiga kahor ZBA.

Dhammaan taariikhda ZBA waa kumeel gaar waana la badeli karaa, ayadoo la sugaayo nidaamka ogeysiiska rasmiga ah.

Ogeysiiska sharciga ah ee dhageysiga waxaa kamid ah taariikhda, waqtiga iyo goobta dhageysiga, qeexitaanka mashruuca lasoo jeediyay iyo xeerka xadgudubka waxaa codsadaha loogu dirayaa boosto, iyo dadka kale ee ZBA u aragto inay saameyn doonto, ayna kujiraan mulkiilayaasha, saraakiisha loo doorto deegaanka, koox kasta oo codsaneysa ogeysiis. Ogeysiiska waxaa sidoo kale lagu soo daabacaa *Boston Herald ugu yaraan 20 maalmood kahor taariikhda dhageysiga.*

Codsadayaashu waxay dooran karaan inay ka noqdaan racfaankooda waqti kasta kahor intaan lasoo dirin ogeysiisyada lana qaban taariikhda dhageysiga. Codsiga looga noqonaayo racfaanka waa inuu yahay qoraal

## **Tallaabada Saddexaad:** *Dhageysiga ZBA*

Codsadaha waa qasab inuu kasoo muuqdo taariikhda, waqtiga iyo goobta lagu qabanaayo dhageysiga. Codsadaha waxaa wakiil ka noqon kara qareen, naqshad dejiye ama xirfadle kale ama ayagaa wakiil iskaga noqon kara dhageysiga.

ZBA waxay dhageysiga ku qaban doonaan Boston City Hall:

1 City Hall Square, Qolka 801
Boston MA 02201

Dhageysiga guddi hoosaadka waxaa lagu qabtaa:

1010 Massachusetts Avenue, Qaybta 5aad Dhismaha
Boston, MA 02118

ZBA waxay racfaanada ula kala hormarin doonaa siday ugu kala horeeyaan ajanda dhageysiga. Xoghayuhu wuxuu kiiska ka akhrin doonaa diiwaanka asagoo sheegaya lambarka kiiska, ciwaanka, qeexitaanka mashruuca iyo xadgudubyada. Codsadaha intaas kadib waxaa la waydiin doonaa inuu sheego magaciisa diiwaanka kuyaala uuna u doodo kiiskiisa asagoo taageerada racfaanka.

Codsadaha waa inuu sheego sababta loo siinaayo codsiga gargaark deegaameynta (tusaale, isticmaalida aan la oggoleyn ama oggolaanshaha isticmaalida xadidan). Codsadaha sidoo kale waa inuu diyaarsadaa caddeymaha taageerada sida qorshooyinka dhismaha, sawiro, moodhelka dhismaha, warqadaha ama codsiyo ay saxiixeen mulkiilayaasha ama caddeyn kasta oo kale oo taageeraysa racfaankooda. Kadib marka codsaduhu soo gudbiyo kiiskiisa una soo gudbiyo ZBA, ZBA waxay dhageysan doontaa farriimaha talo soojeedinta, taageerada, wixii kale ee la xariira, ayna ka helayso saraakiisha la doortay ama wakiiladooda iyo xubnaha bulshada.

XBA waxay go'aankeeda ku gaari doontaa mooshin iyo caddeyn. Xubin kamid ah ZBA ayaa sameyn doona mooshin xubin kale oo ZBA waa inuu soo labeeyo mooshinka. Shan xubin oo katirsan ZBA ayaa qasab inay taageerayaan mooshinka si mooshinku u shaqeeyo una noqdo

go'aanka ZBA. Badanaa, go'aanka ZBA waxaa kujiri doonaa shuruudaha, ama "sharciyada," ee ay qasab tahay in la raaaco si loo joogteeyo helida gargaarka.

Inta badan, ZBA waxay go'aanka ku gaartaa dhageysiga. Mararka qaar, ZBA waxay go'aansan kartaa inay siiwado, ama "badesho", arrinta illaa taariikh dambe.

*Macluumaadka COVID-19-* Dhageysiga hadda waxaa lagu qabtaa qaab oonleen ah ayadoo la adeegsanaayo aalada WebEx sababo la xariira xaalada degdega ah ee caafimaadka bulshada ee joogtada ah. Dhageysiga waxaa lagu qabtaa oonleen ayadoo la fulinaayo amarka Guddoomiye Baker ee uu ku xanibay in kulamada lagu qabto meelo furan.  Si loo hubiyo dhageysiga ZBA inuu u furan yahay dadwaynaha, xubnaha dadwaynaha waxay dhageysiga oga qaybgeli karaan kulan taleefan ama muuqaal ah.

Qorshooyinka waa in lasoo gudbiyo ugu yaraan labo asbuuc kahor xiliga dhageysiga si loo hubiyo in si wanaagsan dib loogu eego uuna ansixiyo baaraha. Haddii aad haysato dukumiinti taageero ama agabyo sida soojeedinada, fadlan hubi inaad iimayl ugu soo dirto *isdboardofappeal@boston.gov* ugu yaraan hal asbuuc kahor dhageysiga. Fariimaha dadwaynaha waa in lasoo gudbiyaa kahor 48 saacadood dhageysiga.  Waxaad shaqaaleysiisan kartaa qareen, naqshad dejiye, ama xirfadle kasta oo kale oo kaa caawiya racfaankaaga.

Kulanada muuqaalka ah, xubnaha dadwaynaha waxay dhageysiga imaanayaan ayagoo ah "ka qaybgalayaal" taas oo la micno ah inaadan iska arki karin shaashada waxaana lagaa xirayaa qaybta hadalka illaa inta maamulku kuu fasaxo inaad faallo dhiibato.

Ambaasadoorka ZBA ayaa diyaar u ah inuu ka jawaabo su'aalahaaga la xariira nidaamyada ZBA iyo tilmaamaha ku saabsan sida looga qaybgalo dhageysiga ayadoo la adeegsanaayo WebEx hal saac kahor inta dhageysigu bilaaban. Sidoo kale tilmaamaheena WebEx waxaad ka arki kartaa *halkaan*. Su'aalaha iyo walaacyada waxaa sidoo kale iimeel loogu soo diri karaa ambaasadarka ayadoo la adeegsanaayo iimeelkaan *zba.ambassador@boston.gov*.

Fadlan iimayl usoo dir *ZBAPublicInput@boston.gov* si aad fariin guud u dhiibato. Codsadaha ma kansali karo taariikhda dhageysiga kadib marka lasop gudbiyo mulkiilayaashana lala socodsiiyo. Waxay dooran karaan in qolyo kale ay wakiil ka noqdaan haddii aysan shaqsi ahaan imaan karin dhegeysiga. Hay'adu waxay sii wadi kartaa hawsha kiiska waxayna codsan kartaa in la baajiyo. *Ogoow in ZBA si ikhtiyaar leh u baajin karto dhageysiga, laakiin ma ahan wax ay ku qasban yihiin.

Haddii codsaduhu doorto inuusan siiwadin hawsha racfaanka, waxay u sheegi karaan ZBA inay doonayaan iskaga baxaan racfaanka.  Kadib marka ay soo gudbiyaan codsiga ka bixida

racfaanka, ZBA waxay caadiyaan diidaa racfaanka xukun la'aaan. Hase yeeshee, codsigaan waa in la siiyaa kahor intaan mudnaanta la siin dhageysiga kiiska. Joojinta racfaanka ayadoon la gaarin xukun waxay codsadaha u oggolaanaysaa inuu dib u bilaabo soo gudbinta racfaanka marka uu rabo asagoon ku qasbaneyn inuu sugo sanadka oo dhan.

## **Tallaabada Afaraad-** *Go'aan Qoraal ah*

Codbixinta ZBA ee lagu oggolaado gargaarka kadib dhageysiga ma ahan tallaabada ugu danbeysa. Go'aanku waa inuu qoran yahay waana inay saxiixdo ZBA laguna buuxiyo ISD. Haddii codsadaha uu matalaayo lataliye, garyaqaanka ayaa nuqulka ugu horeeya siin doona Xoghayaha Fulinta si uu ugu kuurgalo saxnaanta kahor intaan loo gudbin ZBA si ay u saxiixdo. Haddii codsadaha uusan wakiil ka ahayn lataliye, Xoghaha Fulintu wuxuu nuqulka u gudbin doonaa ZBA. Go'aanka waa in lagu soo gudbiyaa ISD muddo 90 maalmood ah kadib dhageysiga, laakiin waqtigaas waxaa sii kordhin kara ZBA. Hase yeeshee, caadiyan go'aanka waxaa lagu soo gudbiyaa ISD kahor 90 ka maalmood ee kama dambeysta ah.

Haddii *ZBA ansixiso codsiga gargaarka deegaameynta,* codsaduhu wuxuu helaa midkood isticmaalka oggolaanshaha xadidan, isticmaalida aan la oggoleyn, ama oggolaanshaha IPOD ayadoo ku xiran codsiga gargaarka. Marka la bixinaayo oggolaanshaha gargaarka deegaameyn kasta, ZBA waxay soo saari kartaa shuruudo ama shuruud la xariirta gargaarka, kaas ay tahay in codsaduhu u hogaansamo si u helo gargaarkiisa ama gargaarkeeda. Tusaalayaasha shuruudaha joogtada ah waxaa kamid ah Dulmarka Naqshada ee BPDA, xadidaada lagu sameynaayo saacadaja hawsha, ama shuruudaha qorax dhaca (oo xadidaya muddada gargaarka deegaameynta uu jiri karo).

Haddii *ZBA diido racfaaanka*, taasi waxaa loola jeedaa in codsaduhu uusan helin gargaarka deegaameynta iyo ISD ma bixin doonto oggolaanshaha soojeedinta. Sidoo kale waxaa loola jeedaa codsadaha masoo gudbin karo codsi ku saabsan isla mashruuca muddo sanad ah oo laga bilaabo taariikhda go'aanka lasoo saaray. Codsaduhu wuxuu soo gudbin karaa codsiga mashruuc kale, laakiin masoo gudbin karo isla mashruucii.

Haddii *ZBA diido codsiga gargaarka deegaameynta ayadoon helin xukun*, taasi wali waxaa loola jeedaa in codsaduhu uusan helin gargaarka deegaameynta iyo ISD ma bixin doonto oggolaanshaha soojeedinta. Waxa ay ku kaladuwan yihiin waa in codsaduhu uusan sugeyn sanad si uu mar kale usoo gudbiyo codsiga isla mashruuca.

Waa siyaasada Guddiga ee Hadda in go'aanada lagu saxiixo qaab elektarooniga ah loona gudbiyo Xubnaha ZBA si ay ugu sameeyaan dib u eegis iyo ansixitaan.

Kadib marka go'aanka qoran ay saxiixaan ZBA una buuxiyo ISD, shaqaalaha maamulka ZBA waxay diri doonaan ogeysiiska go'aanka. Dhammaan shaqsiyaadka helay ogeysiiska dhageysiga guud waxay heli doonaan ogeysiis ku saabsan in go'aanka lagu soo gudbiyay ISD. Waxaa jira 20 maalmood oo racfaanka loogu talagalay lagana bilaabo taariikhda go'aanka lagu soo xareeyay ISD. "Dadka cabashada ka qaba" go'aanka ZBA waxay racfaan usoo gudbin karaan Maxkamada Sare ee Suffolk, laakiin racfaanka waa in lagu buuxiyo Maxkamada labaatan maalmood gudahood.

ISD ma bixiso foomka oggolaanshaha nidaamka dheereynta dhismaha ee la xariira gargaarka deegaameynta illaa go'aanka la saxiixo lana soo gudbiyo iyo illaa inta labaatan maalmood kasoo wareeganayso taariikhda lasoo xareeyay, dhammaan dib u eeginada kale waa la dhameystiray (tusaale, dib u eegida xeerka dhismaha ee ISD, dib u eegida guddiga Ilaaalinta (meesha khuseeysa), dib u eegida Astaamaha (meeshii khuseysa), iwm), iyo shuruudo kasta oo ZBA ay ku dareen oggolaanshaha gargaarka deegaameynta (tusaale Dib u eegida Naqshada BPDA) ayaa laga soo baxay.

**OGSOONOOW:** Dib u eegis lagu sameeyo Astaamaha ayaa looga baahan doonaa codsiyada foomka oggolaanshaha muddada dheer ee nidaamka qorshaha degmooyinka. Dib u eegista Astaamaha ayaa sidoo kale loo baahnaan doonaa kahor intaan la bixin oggolaanshaha duminta. Oggolaanshaha duminta foom oggolaaansho oo yar oo leh shuruudo liis oo tig la saaro, oo ay kujiraan dib u eegista Astaamaha. Marka codsadaha uu qorsheenaayo inuu dumiyo dhismaha uuna dhiso dhismo cusub, oggolaansho dumin oo gaar ah (foomka oggola) ayaa loo baahan yahay si loo dumiyo dhismihii hore marka laga imaado foomka oggolaanshaha muddada dheer ee dhisida dhismaha cusub. Haddii aad qorsheyneyso mashruuc uu kujiro dumin, waxaa lagu talinayaa in lala xariiro Guddiga Astaanta marka la bilaabaayo hawsha.

## Tallaabada Shanaad – *Xeerka Dib u eegista Dhismaha*

Badanaa, Dib u eegista ISD ee u hogaansanaanta Xeerka Dhismaha ee Gobalka waxaa la sameeyaa kadib nidaamka racfaanka ZBA. Marar badan codsaduhu wuxuu soo gudbin doonaa sawiro hordhac ah oo lagu sameyn doono dib u eegista deegaameynta kahor hawsha racfaanka ZBA wuxuuna sugayaa inuu sawiro badan oo qeexan usoo gudbiyo dib u xeerka dib u eegista dhismaha ilaa inatay ka oggaanayaan inay heleen gargaarka deegaameynta la iska rabo. Xaaladahaas, kahor intaan la oggolaan oggolaanshaha, ISD waxay u baahan tahay inay hesho sawirka koodhka dhismaha waxayna eegi doontaa inay u

hogaansan yihiin Xeerka Dhismaha Gobalka.


## **Tallaabada Lixaad -** *Oggolaanshaha ay oggolaato ISD*

Kadib marka la helo gargaarka deegaameynta (oo codsaduhuna soo gudbiyo arrin kasta oo khuseysa) lana dhameystiro dib u eegista xeerka dhismaha, waxaa lasoo saarayaa oggolaanshaha. Hase yeeshee, mararka qaar wakaaladaha kale ee Magaalada waa inay saxiixaan mashruuca (sida Guddiga Ilaalinta ama Guddiga Astaamaha magaalada) kahor inta ISD aysan bixin oggolaansho.

**OGSOONOOW:** Aad ayay muhiim u tahay waana wax muhiim kuu ah inaad buuxiso nidaamka tallaabada ugu danbeysa. Oggolaanshaha iyo/ama shahaadada deganaanshaha lama bixin karo ilaa la helo dhammaan warqadaha sharciga ee goobta lagana soo baco dhammaan shuruudaha. Haddii aadan nidaamka la gabagabeyn, waxaa laga yabaa in mustaqbalka lagama maarmaan noqoto hawsha oo dhan mar labaad, ayadoo koow laga soo bilaabaayo.

ISD waxay haystaa Wakiilka Adeega Maciimiilka si uu dadka ugu hayo nidaamka oggolaanshaha codsiga una diro waaxda arrimahooda ku habboon. Shaqaalaha Adeega Macmiilka oo sidoo kale loo yaqaan xubnaha "Adeegyada Deegaanka" waxay ka turjumayaan falsafada in Waaxdu tahay hay'ad ku saleysan adeega hawlaheeduna noqdaan kuwo la heli karo macmiilkuna fahmi karo.

# ZBA Tracker




[ZBA Tracker](#) wuxuu u ogolaanayaa daawadayaashu inay isticmaalaan khariirad isdhexgal leh si ay uga eegaan mashaariicda raadinaaya gargaarka ayagoo ku dhufanaaya su'aalaha xaafada ee kujirta khariirada ama ayagoo qoraaya ciwaanka bixinaaya macluumaadkaan dheeraadka ah ee soosocda ee loogu talagalay mashruuc kasta oo lasoo jeediyo:

- Xaalada racfaanka
- Taariikhda iyo goobta racfaanka
- Taariikhda dib loo dhigay
- Natiijada dhageysiga
- Lambarada codsiga
- Deegaameynta Degmada
- Taariikhda Lasoo Gudbiyay
- Nidaamka bulshada
- Jadwalka dhageysiga
- Ciwaanka mashruuca lasoo jeediyay
- Xaalada mashruuca
- Macluumaadka Xiriirka
- Nooca racfaanka

# Banaanka Siminaarada

[ISD](#) waxay qabataa dhowr siminaaro iyo AQoon iswaydaarsi oo loogu talagalay in macmiisha laga caawiyo sidii ay si wanaagsan u fahmi lahaayeen hawlaha.  Mawduucyada waxaa lagu daray Barnaamijka Raadraaca Dhaqsaha ee Guriyeynta, nidaamka oggolaanshaha codsiga dhismaha, fahmida dhinacyada xaaladaha xeerka dhismaha iyo dulmarka sharciyada deegaameynta Boston iyo nidaamka racfaanka ZBA.

ISD waxay bixisaa Qaybo Guryo oo Dheeraad ah ( ADU)  rug caafimaad maalinta Tallaadada bisha. Dadka deegaanka waxay qasab karaan waqti ay kaga wada hadlaan qorshaha ADU ee lasoo jeediyay ayagoo iska diiwaangelinaaya Webseedkeena, halkaan sidoo kale waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah.

ISD mar dhaw waxay qabatay Aqoon iswaydaarsiga ku saabsan Deegaameynta 101. Soojeedinta oo la duubay waxaad ka heli kartaa halkaan Aqoon iswaydaarsiga 101. ISD waxay rajeynaysaa inay qabato Aqoon Iswaydaarsiga Deegaameynta 101 sanadka oo dhan.

ISD waxay sidoo kale ka shaqeyneysaa inay abuurto *caafimaadka deegaameynta* oo bile ah looguna talagalay mulkiilayaasha guryaha ee kaligood nool iyo labo guri oo qoysas ah iyo mulkiilayaasha ganacsiga si ay qabsadaan balan ayna kusoo gudbiyaan su'aalaha ku saabsan buuxinta codsiga oggolaanshaha. Qaar kamid ah mawduucyada iyo ciladaha lagu dari karo caafimaadka Deegaameynta waa:

## Cildaha Deegaanka

- Waxyaabaha dheeraadka ah
- Alwaaxyada gudaha
- Alwaaxyada saqafka
- Fooqa, deyrka
- Barkada dabaalasha
- Baakinada banaanada
- Dhismooyinka banaanka sida geerashka
- Balaarinta aaga sagxada illaa gudaha beesmitiga
- Qolalka yaryar
- bAnaanka guriga iyo qolalka ay cadceedu soo gasho

## Ciladaha ganacsiga

- Balaarint Booska
- Xaafiisyada
- Isticmaalida Ganacsiga Guriga iyo in kale oo badan
- Calaamadaha ganacsiga
- Isticmaalida maqaayada gada cuntooyinka la qaato

*Taariikhda iyo waqtiyada aqoon iswaydaarsiga soo socda fadlan isha ku haay Bogga Macluumaadka ee lagu qoro wixii cusub iy Bogeena Youtubeka *si aad u hesho casharo*

## Cidda lala xariiraayo

Waaxda kormeerka Adeegyada
Qorshooyinka iyo Waaxa Deegaameynta
1010 Massachusetts Ave.
Boston, MA 02118
617.635.5300
Isdpzreview@boston.gov

Gollaha Racfaanka
1010 Massachusetts Ave. Qaybta 4aad ee Dhismaha
Boston, MA 02118
617.635.4775
***Codsadayaasha iyo dadwaynuhu si ay u oggaadaan xaalada racfaanada ama si codsadayaashu usoo gudbiyaan macluumaadka dhageysigooda.
ISDboardofappeal@boston.gov
***Si dadwaynuhu usoo gudbiyaan faallooyinkooda iyo walaacyo kasta oo ku saabsan racfaanada
ZBAPublicInput@boston.gov

Qorsheynta Boston iyo Hormarinta Hay'ada
Boston City Hall, Qaybta 9aad ee Dhismaha
Boston, MA 02201
617.722.4300

Xaafiiska Maayarka ee qaabilsan Adeegyada Xaafada
Boston City Hall, Qolka 805
Boston. MA 02201
617.635.3485

# APPENDIX

**Waaxda Kormeerka Adeega (Inspectional Service Department)**
https://www.boston.gov/departments/inspectional-services

**Ilaalinta Biyaha Dhulka Hoostiisa Kujira (Groundwater Conservation)**
http://www.bostongroundwater.org/groundwater-conservation-overlay-district-gcod-article-32-zoning.html

**Deegaameynta Degmada iyo Meelaha Degmada Hoos Yimaada (Zoning District and Subdistrict)** *(Meesha dhismooyinku kuyaalaan)*
http://maps.bostonredevelopmentauthority.org/zoningviewer/

**Khariirada Deegaameynta BPDA (BPDA Zoning Viewer)**
http://maps.bostonredevelopmentauthority.org/zoningviewer/

**Sharciga Deegaameynta Boston (Boston Zoning Code)**
https://library.municode.com/ma/boston/codes/redevelopment_authority

**Sharci Balaarinaaya Qaar kamid ah Tallaabooyinka ku aadan COVID-19 ee la sameeyay Inta Lagu Jiray Xaalada Deg-dega ah**
https://www.mass.gov/service-details/updated-guidance-on-holding-meetings-pursuant-to-the-act-extending-certain-covid-19-measures

**Guddiga Racfaanka ee Toddobada Xubno iyo Toddobada Xubnood ee Badelka u ah**
https://www.boston.gov/departments/inspectional-services/zoning-board-appeal

**Taariikhaha Dheeraadka ah ee Kulanka** *(ee laga yaabo in lagu daray)*
https://www.boston.gov/departments/inspectional-services/zoning-board-appeal

**Bogga Onlaynka**
https://www.boston.gov/departments/inspectional-services/how-file-appeal-zoning-board

**Xaafiiska Meeyarka ee Adeegyada Xaafada**
https://www.boston.gov/departments/neighborhood-services

**Ogeysiiska Dadwaynaha**
https://www.boston.gov/public-notices

**Aalada Raadraaca ee ZBA**
https://experience.arcgis.com/experience/c019ba9a25cb4f33bb6cdd2f69b543d4/page/page_0/

**Ka qaado Racfaan** *(Bogga onlaynka)*
https://www.boston.gov/departments/inspectional-services/how-file-appeal-zoning-board

**Nidaamka Jadwalka Bulshada/Kulanka Mulkiilayaasha**
https://www.boston.gov/departments/neighborhood-services

**Tilmaamaha WebEx**
https://docs.google.com/document/d/1rqneQz7l0y8m6c2637vcJK8Iar-vCvCsAz7ve6_QBJU/edit?usp=sharing

**Siyaasada Guryaha ee Qaybaha Guryaha ee dheeraadka ah (Additional Dwelling Units (ADU)**
https://www.boston.gov/departments/neighborhood-development/addition-dwelling-units

**Waaxda Kormeerka Adeegyada (Inspectional Services Department)**
https://www.boston.gov/departments/inspectional-services

**You tube**
https://www.youtube.com/channel/UChOquEE4QscQ-EkxXUmz8lw